


Kitaabka Quduuska ah ee loogu talo
galay Carruurta Soo-jeedinayaa



Nuux iyo
Daadkii
Weynaa



Waxa qoray: Edward Hughes
Waxa Tusaaleeyay: Byron Unger; Lazarus;
Alastair Paterson
Waxa dhaqan-geliyay: M. Maillot; Tammy S.
Waxa tarjumay: Zemendale Translation Service
email: zemendale@gmail.com
Po Box 32155, Addis Ababa, Ethiopia
Waxa soo saaray: Bible for Children
www.M1914.org

BFC
PO Box 3
Winnipeg, MB R3C 2G1
Canada



©2021 Bible for Children, Inc.

Liisan: Waxaad xaq u leedahay inaad koobiyayso ama daabacato
qisadan, in alla inta aanad ka iibinaynin.





Nuux waxa uu ahaa
nin Ilaah caabuda. Qof
walibana isaga wuu nacay
oo waxay dadku caasiyeen
Ilaah. Maalin ayaa dabeenta,
Ilaah waxa uu isaga u

sheegay
arrin
naxdin
leh.



Ilaah wuxuu Nuux u sheegay
"Dhulka waxaan ka baabi'in
doonaa dulmi falayaasha."
Waxa kaloo Ilaah isaga ku
yidhi, "Qoyskaaga oo keliya
ayaan badbaadin doonaa."




Ilaah wuxuu Nuux u sheegay inuu iman doono daad weyn oo qarin doona dhulka oo dhan. Nuux waxa lagu amray, "Dooni ka samayso qoryo loox ah, oo ha noqoto mid ku filan qoyskaaga iyo xayawaan faro badan!"



Ilaah waxa uu Nuux u sheegay sidii
uu wax u samaysan lahaa, oo Nuuxna
arrintaas ayuu ku mashquulay!






Markii Nuux uu ka
waramay sababta
uu doonta u
samaysanayo
waxa
dhacday

in dadkii
ay isaga ku
majaajilloodeen.
Nuux laakiinse
wuxuu iska sii watay
samayntii doonta.





Sidoo kale wuxuu
dadka u sheegayay
waxyaalaha
Ilaah ku
saabsan,


balse
cidina may
dhegeysanin
hadalkiisa.




Nuux waxa uu lahaa
iimaan weyn. Waxa uu
rumaystay Ilaah in kasta
oo wakhtigaas wax roob
ahi aanu hore u di'in. Si
dhakhso ahna doonnidii
waxa ay
diyaar u
ahayd
in la
raro.




Waxa haddaba imika yimid xayawaankii. Ilaah
waxa uu keenay noocyada xayawaanka oo mid
walba lab iyo dhedig ah.




Shimbiro waaweyn iyo kuwo yaryar, dugaag yaryar,
iyo kuwo dhaadheer dhammaantood waxa ay soo
galeen doonnidii.




Waxa laga yaabaa in dadku ay ku qaylinayeen oo caayayeen Nuux markii uu xayawaanka ku gurayay doonnida. Waxa dhacday in aanay denbaabitaankii ay Ilaah ku denbaabayeen aanay joojinnin. May odhanin aannu soo galno doonnida.)






Ugu
danbayntii,
xayaawaankii
iyo shimbirihii
waxa ay fuuleen
doontii. Ilaahna
waxa uu Nuux ku yidhi,
"Soo gal doonnida adiga
iyo dadka gurigaaguba."






Dabeetana,
Nuux iyo
naagtiisii
iyo saddexdiisii
wiil iyo naagohoodii
waxa ay galeen doonnidii.
Oo Ilaahna waxa uu dabeeto
xidhay albaabkii doonnida.



A simple line drawing of a landscape. On the left, several parallel lines slope downwards from the top left towards the bottom right, representing a hillside. On the right, a single line forms a valley with a small dip in the center, representing a valley or a low point in the terrain.

Waxa kaddibna soo da'ay roobkii.
Waxa dhulka oo dhan qariyay roob
xooggan muddo gaadhaysa afartan
cisho iyo afartan habeen.





Biyihii
daadka
ahaa waxa
ay qariyeen
magaalooyinkii iyo
xaafadihii. Markii roobku
dhammaadayna, xitaa buuraha waxa
qarinaayay biyo. Wax kasta oo
noole ahaana waa uu dhintay.







Markii biyuhu ay burqanayeen, doonnidu waxay dul sabbaynaysay biyaha korkooda. Waxa laga yaabaa doonnida gudeheedu inuu ahaa mugdi, waxa laga yaabaa inay ahayd meel laga cabsado. Laakiinse doonnidu waxa ay Nuux ka ilaalisay daadkii.



Markii muddo shan bilood ah
daadku soconayay, Ilaah waxa uu
soo diray dabayl wax qallajisa.
Dabeetana doontii waxa ay ku si
tartiib ah uugu dul fadhiisatay
buuraha
Araarad.




Nuux waxa uu doonnida
gudeheedii kusii jiray muddo
gaadhaysa afartan cisho markii
ay biyuhu yaraadeen.





Nuux waxa uu diray
tuke iyo qoolley oo ka
baxay daaqadda doonnida.
Markii qollaydii ay weyday
meel engegan oo ay ku dul
fadhiisato, waxa yay dib
uugu soo noqotay
Nuux.





Muddo toddobaad ah dabadeed, Nuux mar kale ayuu haddana tijaabiyay. Qoollaydii waxa ay markan lasoo noqotay iyadoo afka ku sidda caleen saytuun oo qoyan. Usbuucii xigayna Nuux waxa uu ogaaday inuu dhulku engaganyahay waayo qoollaydii dib uuguma soo noqon isaga.




Ilaah wuxuu Nuux u sheegay inay gaadhay
wakhtigii uu kasoo bixi lahaa doonnida.

Si wada jirana, Nuux iyo qoyskiisii
waxa ay u dejiyeen
xayawaankii.



Sidee haddaba Nuux uu
arrintaas uuga mahad celin
lahaa! Waxa uu dhisay
meel allabari oo waxa uu

caabuday Ilaahii isaga
iyo goyskiisaba ka
badbaadiyay daadkii
aadka u darnaa.



Ilaah
waxa uu
Nuux siiyay
ballanqaad
cajiib leh.

Waxa uu sheegay
inaanu mardanbe
dunida kusoo dayn
doonin daad si uu
denbiyadooda uugu
ciqaabo.



Waxa
uu Ilaah
ballanqaadkiisa
u sameeyay wax
lagu xasuusto.

Jeegaanta ayaa
waxa ay ahayd
calaamadda u
taagan ballanqaadka
Ilaah.



Nuux iyo reerkiisii
waxa ay heleen
bilow cusub daadka dabadiis.
Muddo dabadeedna, farcankiisii
waxa ay dib u cammireen
dhulka. Quruumaha
dunida ku nool oo
dhammina

waxa
ay ka yimaaddeen
Nuux iyo carruurtiisa.



Nuux iyo Daadkii Weynaa


Qiso ka ahaatay Ereyga Ilaah,
Kitaabka Quduuska ah,

waxa laga helayaa

Bilowgii 6-10

“Erayadaada furniinkoodu wax buu
iftiimiyaa.” Sabuurka 119:130





Dhammaad



3



60



Qisadan ku xusan Kitaabka Quduuska ahi waxay inoo sheegaysaa wax ku saabsan Ilaaheenna cajiibka ah ee ina sameeyay isla markaasna kaa raba inaad isaga ogaato.

Ilaah wuxuu ogsoonyahay inaan samaynay waxyaalo xunxun, kuwaas oo uu Ilaah ku magacaabo denmbi. Cigaabka denbiguna waxa weeyi dhimasho, laakiinse Ilaah aad ayuu kuu jecelyahay waxaanu kuusoo diray Wiilkiisa madiga ah oo ah Ciise, si uu ugu dhinto iskutallaabta korkeeda una maro cigaabka denbigaaga. Kaddib Ciise dib ayuu usoo noolaaday isagoo aaday Samada! Haddii aad Ciise rumaysantahay oo aad weydiisato inuu kaa cafiyo denbiyadaada, waa uu kaa dhaafi doonaa! Waa uu iman doonaa isagoo adiga kugu dhex noolaan doona, oo adiguna isaga ayaad weligaa la noolaan doontaa.

Haddii aad rumaysantahay in middani ay run tahay, sidan ku dheh Ilaah: Qaaligaygii Ciisow, waxaan rumaysanahay inaad tahay Ilaah, iyo inaad noqotay aadane si aad uugu dhimato denbiyadayda, oo imikana dib ayaad u noolaatay. Fadlan noloshayda soo gal oo cafi denbiyadayda, si aan markaas imika u helo nolol cusub, oo maalin maalmaha ka mid ahna aan adiga kuula jiro abid. Igu caawi inaan ku addeeco oo aan u noolaado sidii anigoo ah ilmahaaga. Aamiin.

Akhri Kitaabka Quduuska ah oo maalin walba la hadal Ilaah!
Yooxanaa 3:16

